



Seattle
Office of Immigrant
and Refugee Affairs

Jawaab-celinta Degdegga ah ee 2026
Deeqaha Yaryar ee Bulshada

**CODSI SOO-JEEDINNO
TILMAAMAHA**

Ujeedada iyo Taariikhda

Magaalada Seattle waa Magaalo Soo Dhawayn leh, waxaana ku dadaalnaa inaan hubinno in dadka deegaanka ay helaan xurmo iyo nabadgelyo. Iyadoo la raacayo ballanqaadkan iyo iyadoo laga jawaabayo u-doodista bulshada, Golaha Magaalada Seattle wuxuu ansixiyay kordhin joogto ah oo dhan \$4 milyan oo lagu darayo miisaaniyadda 2026 ee Xafiiska Arrimaha Qaxootiga Iyo Soo Galootiga (OIRA) si loo xoojiyo adeegyada muhiimka ah ee bulshada soo galootiga iyo qaxootiyaasha ee Seattle, oo ay ku jirto maalgelinta hawlaha jawaab-celinta degdegga ah.

Labo boqol iyo siddeetan kun (\$280,000) oo ka mid ah maalgelintaan waxaa loo jari doonaa deeqaha yaryar ee bulshada. OIRA waxay doonaysaa inay qandaraasyo hal mar ah la gasho ururrada bulshada si ay u bixiyaan:

- **Gargaarka bulshada ee baahiyaha aasaasiga ah**
- **Ogow Bandhigyada Xuquuqdaada (KYR) ama fadhigada macluumaadka bulshada**
- **Qorshaynta badbaadada qoyska**

Maalgelintaan waxaa loogu talagalay in kheyraad lagu siiyo Ururada Ku Saleysan Bulshada iyo kooxaha gaarka u ah xaafadaha si wax looga qabto daldaloolada adeegga looguna jawaabo caqabadaha ka dhashay xoojinta fulinta sharciga soo galootiga ee hadda jira iyo kuwa soo kordhaya iyo isbeddellada xeerarka federaalka.

Barnaamijkan wuxuu doonayaa inuu u adeego bulshooyin dhowr ah oo ku yaal aagga Seattle, oo ay ku jiraan kooxaha gaarka u ah xaafadaha, xubnaha bulshada ee ku nool ama ka shaqeeya oo waxna ka barta gudaha Seattle.

Baaxadda Shaqada

Codsadayaasha guulaysta ayaa mas'uul ka noqon doona diyaarinta soo-jeedin loogu talagalay in wax looga qabto baahi degdeg ah oo ay qabto bulshadoodu iyadoo ay isku diyaarinayaan sharci-fulinta soo korartay iyo/ama ay taageerayaan xubnaha bulshada ee ay saameeyeen sharci-fulinta socdaalka iyo isbeddellada xeerarka socdaalka ee federaalka.

Gaar ahaan, dadka deeqda la siiyo waxaa laga filayaa inay fuliyaan mid ama wax hal ka badan hawlaha soo socda:

1. Gargaarka bulshada ee baahiyaha aasaasiga ah
2. Tababarka Ogow Xuquuqdaada/Kulamada Waxbarashada Bulshada
3. Qorshaynta badbaadada qoyska

Kaalmada Bulshada ee Baahiyaha Aasaasiga ah: Kaalmada bulshada ee baahiyaha aasaasiga ah waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo xubnaha bulshada ee ay saameeyeen sharci-fulinta socdaalka iyo/ama isbeddellada xeerarka socdaalka ee federaalka si'ay u helaan baahiyaha aasaasiga ah, agabka iyo bixinta khidmadaha. Kharashyada la oggol yahay waxaa ka mid ah hawlaha sida: adeegga keenista cuntada, xarunta cunto-bixinta, agabka aasaasiga ah (caanaha carruurta, xafaayadda), khidmadaha jiidista baabuurta iyo khidmadaha socdaalka. (Ogow inay jiraan [barnaamijyada Magaalada Seattle si looga caawiyo adeegyada korontada iyo biyaha](#), [kaalmada kirada](#), [iyo cuntada](#)).

Tababarka Ogow Xuquuqdaada ama Kulamada Waxbarashada Bulshada: Martigeli oo bixi waxbarasho ku saabsan mowduucyo khuseeya oo waqtigooda ku habboon bulshooyinka soo galootiga ah ee Seattle. Mowduucyada suurtagalka ah waxaa ka mid noqon kara, laakiin kuma koobna:

- Isbeddellada dhowaan dhacay ama laalan ee sharciga iyo xeerarka socdaalka
- Badqabka bulshada soo-galootiga ah iyo xiriirka ay la yeeshaan hay'adaha fulinta sharciga
- Shaqada soo-galootiga, iskii-u-shaqeynta, xuquuqda iyo ilaalinta shaqaalaha soo-galootiga ah
- Xaaladda socdaalka iyo xuquuqda kiraystaha
- U-qalmitaanka soo-galootiga ee caawimada dowladda
- U-qalmitaanka soo-galootiga ee shatiga darawalka iyo aqoonsiga gobolka
- Arrimaha saameynaya ganacsiyada ay leeyihiin soo-galootiga

Codsadayaashu waa inay hubiyaan in dhacdo kasta ay ku jiraan:

- Martigelinta dhacda/kulanta iyo saadka (maamulka goobta/madal khad leh, qabanqaabada si'ay u noqoto mid la heli karo, turjumaad afka ah haddii loo baahdo).
- Wacyigelinta bulshada iyo xayeysiinta si loo xaqiijiyo ka-qaybgalka dhageystayaasha la beegsanayo.
- Keenista hadaljeediye aqoon u leh ama khabiir ku takhasusay mawduuca, kaas oo laga yaabo inuu ka yimaado meel ka baxsan ururka.
- Bixinta adeegyo ka jawaabaya dhaqanka oo luqad ahaan la heli karo, oo ay ku jirto bixinta turjumaad toos ah oo loogu talagalay ka qaybgalayaasha munaasabadda iyo/ama macluumaad la turjumay sida ku habboon.

Qorshaynta Badbaadada Qoyska ee Soo Galootiga: Caawinaad ku saabsan abuurista qorshayaasha daryeelka carruurta ama dadka ku tiirsan iyo u diyaargarowga sharci-fulinta haddii ay dhacdo xabs-igelin ama masaafurin.

Bulshada Diiradda La-Saarayo

Soo-jeedinnadu waa inay taageeraan xubnaha bulshada, gudaha Seattle, ee ku nool, ka shaqeeya, dhigta dugsiga, ama leh ganacsiyo ku yaalla Seattle, ama shakhsiyaadka lagu xiray ama wajahaya dacwadaha masaafurinta. Mudnaanta waxaa la siin doonaa kooxaha soo galootiga ah ee xaaladdooda sharci ay saameeyeen isbeddelladii ugu dambeeyay ee sharciyada socdaalka, Xeerarka, ama hab-dhaqamada dowladda. Dhacdooyinka, ka-qaybgalayaasha u qalma waxaa sidoo kale ku jiri kara adeeg-bixiyeyaasha u adeega dadka deegaanka Seattle.

La-socoshada & Warbixinta

Dhammaan dadka deeqda la siiyay waxaa looga baahan doonaa inay soo gudbiyaan warbixinnada tirada iyo tayada leh inta lagu jiro muddada deeqda. Dadka deeqda la siiyay waxay u baahan doonaan inay la socdaan macluumaadka macmiilka laakiin warbixinnada la soo gudbiyo waxay noqon doonaan oo kaliya kuwo la isku daray. OIRA waxay bixin doontaa qaabka warbixinta. Warbixinnadu waxay u baahan karaan macluumaadka soo socda, ee ku saabsan qodobbada xogta ee hoose:

- Dhammaan dhacdooyinka: La soco oo wargeli OIRA tirada dhacdooyinka, mowduuca(yada), tirada ka qaybgalayaasha, iyo luqadaha loogu adeegay.
- Qorshaynta badbaadada qoyska: Tirada qorshayaasha la dhammaystiray.
- Baahiyaha aasaasiga ah: Caddaynta ururka ee u-qalmitaanka iyo bixinta, rasiidyada ama warbixinnada maaliyadeed ee nooca baahida (cuntada, waxyaabaha muhiimka ah ee guriga, khidmadaha, iwm.)

Sample Report Template – OIRA Community Small Grant	
Organization Name	
Contract Number	
Project Title	
Type of Project – Depending on the type of project selected, the report will vary. Some projects will contain more than one type of activity, in which case the organization will need to provide the necessary information for each type of activity.	
Check all relevant activities: <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Community aid for basic needs <input type="checkbox"/> Know Your Rights (KYR) presentations or community information sessions <input type="checkbox"/> Family safety planning 	
Summarize the activity and the services provided. When applicable, provide: <ul style="list-style-type: none"> • Event type (online or in person) AND topics covered • Event location • Event date • Number of attendees • Number of individuals served • Total amount if program supplies purchased <p><i>Note that all program supply purchases must have accompanying receipts.</i></p>	
Response:	

Faahfaahinta Maalgelinta

- Wadarta Lacagaha Diyaarka ah: Ilaa \$280,000

- **Abaalmarinnada:** Hay'ad kasta oo u qalanta waxaa la siin karaa ilaa \$10,000. Go'aannada maalgelinta waxay noqon karaan inaan wax deeq ah la siin, qayb ka mid ah ama qaddarka buuxa ee la codsaday. Codsadayaashu waxay soo gudbin karaan codsiyo badan; hase yeeshee, hal deeq oo keliya ayaa la siin doonaa codsade kasta oo u qalma oo hoos timaada fursadda deeqaha yaryar.
- **Xilliga kama dambaysta ah ee codsiga:** Codsiyada waxaa loo aqbali doonaa si isdaba joog ah, iyadoo go'aannada lacag bixinta lagu dhawaaqi doono muddo lix toddobaad gudahood ah marka la soo gudbiyo codsiga, inta ay lacaguhu diyaar yihiin ama ilaa ay lacaguhu ka dhammaanayaan.
- **Muddada Qandaraaska:** Dhammaan hawlaha la maalgeliyay waa inay dhacaan inta lagu jiro sannad-taariikheedka 2026 ama ugu dambayn Diseembar 31, 2026.

Yaa Ku Habboon Codsashada?

Waxaan si xooggan ugu dhiirgelineynaa kooxaha yaryar ee aan adeegyada sharciga bixin, ee ku saleysan xaafadaha ama isbahaysiyada ku-meel-gaarka ah, iyo ururrada kale ee ay bulshada hoggaamiso ee ay sida aadka ah u saameeyeen isbeddellada xeerarka socdaalka ee federaalka inay soo codsadaan. Ururada yaryar ee ku cusub Codsiyada Soo-jeedinta (RFP) iyo qandaraasyada Magaalada ayaa sidoo kale si xoog leh loogu dhiirgelineyaa inay codsadaan. Magaalada Seattle waxay taageeri doontaa noocyo kala duwan oo mashaariic gaar ah, hal-abuur leh, isla markaana degdeg ah oo ka dhaca gudaha xuduudaha magaalada Seattle.

Codsadayaasha u qalma waa inay buuxiyaan shuruudaha ugu yar ee soo socda:

- Ahow hay'ad faaiido doon ahayn oo leh 501(c)(3) AMA lahaanshaha kafiil maaliyadeed leh 501(c)(3).
- Ururradu waa inay muujiyaan inay si weyn uga kooban yihiin iyo/ama shaqadoodu ay si weyn u anfici doonto bulshada Seattle.

Abaalmarinnada Maalgelinta Badan

Codsadayaashu waxay maalgelin ka heli karaan OIRA ama waaxyaha kale ee Magaalada Seattle iyagoo weliba u qalmi kara lacagahaan. Hase yeeshee, mudnaanta waxaa la siin doonaa mashaariicda/barnaamijyada aan haysan ilo kale oo maalgelin ah oo loogu talagalay RFP-gaan gaarka ah ee leh jadwalkaan.

Waxaan La Maalgelin Doonin

- Mashruuc kasta oo si firfircoon ama si sharci darro ah u hor istaaga ama u farageliya fulinta sharciga socdaalka ee federaalka.
- Talo sharciyeed oo aanay bixin qareen soo-galooti ama qareen aqoonsi ka haysan Waaxda Caddaaladda.
- Kaalmada lacageed ee shakhsiyaadka.
- Kaalmada kirada.

Kulamada Macluumaadka

Ku biir kulan macluumaad oo fogaan arag ah oo ikhtiyaari ah maalinta, Abriil 14, 2026, si'aad wax badan uga ogaato habka codsiga iyo tayada soo-jeedinta xooggan iyo inaad waydiiso wixii su'aalo ah. Kulamo Su'aalo iyo Jawaabo ah oo labadii biloodba mar ah ayaa loo qaban doonaa codsadayaasha xiisaynaya ilaa inta ay

lacagtu ka dhammaanayso. Taariikhaha iyo faahfaahinta kulamada waxaa lasoo wadaagi doonaa waqti dambe.

Kulamada Su'aalaha iyo Jawaabaha ah oo ikhtiyaari ah oo loogu talagalay codsadayaasha suurtagalka ah (lagu bixiyo Teams)	
Abriil 14, 2026 Harkii – 1 pm PDT	Kulanka Microsoft Teams Uga qeybgal: https://teams.microsoft.com/meet/25766735892354?p=Tj7rtWX7j85aC4j1sv Aqoonsiga Kulanka: 257 667 358 923 54 Koodhka sirta ah: a5ev6TW3 Caawin u baahan? Tixraaca nidaamka Ku soo gal wicitaan +1 206-686-8357, 927683515# Maraykanka, Seattle Raadi lambar maxalli ah Aqoonsiga shirka taleefanka: 927 683 515# Kaga biir qalabka shirarka muuqaalka ah Furaha kiraystaha: seattle@m.webex.com Aqoonsiga Fiidiyowga: 115 525 331 5
Abriil 14, 2026 6 - 7 pm PDT	Kulanka Microsoft Teams Uga qeybgal: https://teams.microsoft.com/meet/25506522182811?p=qpBZgV3fYEOvqPPUr Aqoonsiga Kulanka: 255 065 221 828 11 Koodhka sirta ah: Nr9E7wd2 Caawin u baahan? Tixraaca nidaamka Ku soo gal wicitaan +1 206-686-8357, 773987426# Maraykanka, Seattle Raadi lambar maxalli ah Aqoonsiga taleefanka shirka: 773 987 426# Kaga biir qalabka shirarka muuqaalka ah Furaha kiraystaha: seattle@m.webex.com Aqoonsiga Muuqaalka: 113 141 929 2

Tilmaamaha Gudbinta

Codsiyada waa in lagu helaa qaabka PDF iyadoo lagu soo dirayo iimeelkaan:
OIR_SmallGrants@seattle.gov

Jadwalka Hannaanka Codsiga (RFP)

Guddi eegis ayaa eegi doona codsiyada dhammaystiran. Codsadayaashu waxay filan karaan inay jawaab ka helaan OIRA muddo 6 toddobaad gudahood ah laga bilaabo gudbinta codsiga.

Liiska Hubinta Soo-jeedinta

Codsi RFP oo dhammaystiran waa inay ku jiraan kuwa soo socda:

- Xaashida daboolka soo-jeedinta (waxay ku jirtaa xirmadan).
- Caddaynta warqadda IRS 501(c)3 ee ururkaaga ama kafaala-qaadahaaga maaliyadeed.
- Qoraalka soo-jeedinta (ugu badnaan 2 bog).
- Miisaaniyadda mashruuca – Fiiri tusaalaha miisaaniyadda

Wixii Macluumaad Dheeraad ah

Codsadayaashu waxay soo diri karaan su'aalaha ku saabsan habka codsiga, taageerada turjumaada afka/turjumaada qoraalka/helitaan-kaalmo naafo ama waxay codsan karaan inay ballansadaan kulan fool-ka-fool ah oo ay la yeeshaan Maareeyaha Barnaamijka iyagoo iimayl u soo diraya

OIR_SmallGrants@seattle.gov ama soo wacaya (206) 727-8515. Shaqaalaha OIRA ayaa diyaar u ah inay la kulmaan waqti ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah iyo maalmaha fasaxa toddobaadka oo lagu arko ballan la-sii qabtay.

Office of Immigrant and Refugee Affairs (Xafiiska Arrimaha Qaxootiga Iyo Soo-Galootiga)

Deeqaha Yar-yar ee Bulshada ee Jawaab-celinta Degdega ah ee 2026

Xaashida Daboolka Codsiga

MACLUUMAADKA CODSADAH

Magaca Codsadaha ama Ururka:

CINWAAN:

Magaalada, Gobolka, Zip:

Bog-khadka(haddii ay khuseyso):

QOFKA SAXIIXI DOONA HESHIISKA IYO QAANSHEEGTA HADDII UU KA DUWAN YAHAY HOGGAAMIYAHA MASHRUUCA

Magaca:

Cinwaanka:

Emaalka:

Lambarka Taleefanka:

HOGAAMIYAHA MASHRUUCA

Magaca:

Cinwaanka:

Emaalka:

Lambarka Taleefanka:

XAALADDA URUR AAN FAA'IIDO DOON AHAYN

FADLAN CALAAMADI MID:

hay'adda hormuudka ah waxay leedahay aqoonsiga 501c3
mashruucu wuxuu leeyahay kafiil maaliyadeed (magaca kafiilka maaliyadeed):

CADADKA LA CODSANAYO: \$

TAARIKHDA BILLOWGA MASHRUUCA

CODSIGU WUXUU KA KOOBAN YAHAY WAXYAABAHA LOO BAAHAN YAHAY:

- Caddaynta warqadda IRS 501(c)3 ee ururkaaga ama kafaala-qaadahaaga maaliyadeed.
- Faahfaahinta soo jeedinta (ugu badnaan 2 bog).
- Miisaaniyadda mashruuca – iyadoo la isticmaalayo qaabka miisaaniyadda ee la bixiyay

Office of Immigrant and Refugee Affairs (Xafiiska Arrimaha Qaxootiga Iyo Soo-Galootiga)

Deeqaha Yaryar ee Bulshada ee Jawaab-celinta Degdegga ah ee 2026

Su'aalaha Qoraalka/Sheekada

Fadlan ku koob jawaabtaada **waxaan ka badnayn 2 bog**.

1. Mashruuc nooc ee ah ayaad rajaynaysaa inaad ku fuliso maalgelintaan la codsaday (calaamadi dhammaan inta khusaysa):

- Dhacdada Waxbarashada Bulshada ee Tababarka Ogow-Xuquuqdaada
- Qorshaynta badbaadada qoyska
- Gargaarka bulshada ee baahiyaha aasaasiga ah

2. **Faahfaahinta Mashruuca:**

Bixi faahfaahin ku saabsan mashruucaaga la soo jeediyay, oo ay ku jirto qorshe shaqo oo kooban laga bilaabo bilowga ilaa dhammaadka. Ku dar faahfaahinta soo socota marka ay khusayso: magaca barnaamijka la soo jeediyay, goobta, taariikhda ama xilliga, tirada kulamada, dadka diiradda la saarayo, luqadaha loogu adeego, qiyaasta tirada xubnaha bulshada ee loo adeegayo, cadadka maalgelinta ee la codsaday, iyo sida aad u diiwaangelin doonto una soo sheegi doonto dhammaan hawlaha mashruuca.

3. **Saameynta Bulshada:**

Sidee bay bulshooyinka aad damacsan tahay in aad u adeegto u saameysay sharci-fulinta socdaalka? Sharrax caqabadaha gaarka ah ee ay la kulmaan, iyo sida mashruucaaga la soo jeediyay ee loogu talagalay inuu wax uga qabto baahiyahaas. Waa maxay natiijooyinka ama isbeddellada aad filayso inaad u gaarto xubnaha bulshada mashruucaaga dartiis?

4. **Xiriirada Bulshada:**

Sidee ayuu ururkaagu ugu xiran yahay bulshada aad qorshaynayso inaad u adeegto? Sidee ayaad u gaari doontaa oo aad ula xiriiri doontaa dadka saameynta ugu weyn gaartay? Wadaag wixii tusaale ah oo ku saabsan mashaariic la mid ah oo aad dhammaystirtay (haddii ay khuseyso).

5. **Suurtogalnimada Mashruuca:**

Waa maxay doorarka shaqaalaha/mutadawiciinta ee lagama maarmaanka u ah hirgelinta mashruucaan? Sharrax doorarka shakhsiyaadka fulin doona dhammaan hawlaha mashruuca, oo ay ku jiraan warbixinta iyo qaansheegadka.

Office of Immigrant and Refugee Affairs (Xafiiska Arrimaha Qaxootiga Iyo Soo-Galootiga)

Deeqaha Yaryar ee Bulshada ee Jawaab-celinta Degdegga ah ee 2026

Miisaaniyadda Soo-jeedinta

Kuwaan waa Qaybaha kharashka (codsaduhu waxa uu ku dari karaa in ka badan hal shay oo saf ah qaybahan)

Qaybaha	Sharraxaad	Lacagta
Kharashyada Shaqaalaha (Waxaa ku jira Waqtiga Mutadawiciinta) <ul style="list-style-type: none">Kharashyada la xiriira shaqaalaha iyo tababartayaasha maamuli doona mashruuca.Shaqooyinka mushaarka leh, sheeg sicirka mushaarka iyo tirada saacadaha la shaqeyn doono.		
Kharashyada Adeegyada Xirfadlaha <ul style="list-style-type: none">Kharashyada la xiriira la-taliyayaasha, iibiyayaasha, iyo adeegyada.		
Kharashyada Agabka iyo Qalabka Mashruuca <ul style="list-style-type: none">Kharashyada la xiriira qalabka loo baahan yahay si loo dhammaystiro mashruuca.		